Hab dhaqanka IRC

DAACADNIMO | ISLA XISAABTAN | ADEEG

Hal beegga hab-dhaqan xirfadeysan

TUSMO

Fariin hoggaamineed 1

Qiyamkayaga 2

Mabaadi'da hogaamineed 2

Xilka inaka saran hirgelinta xeerkaan 3

Waajibka/xilka inaka saran saaxiibbadeena shaqa 4

Xilka/waajibka inaka saran macaamiisheena 6

Xilka/waajibka inaka saran deeq bixiyayaasheena 8

Waajibka/xilka inaka saran Macaamiisheena 10

Waajibka/xilka inaka saran ururadda shaqadu inaga dhexeyso 12

Xilka/waajibka inaka saran hay;addeena 14

Xilka inaka saran bulshada 16

Taageero (gacan helid) 18

- U dhug lahaanta anshax doorinta/akhlaaq 18
- Waajibka ah inaad hadashid 18
- Qaabka/dariiqada aad ku muujin kartid dareenkaaga ama haddii aad cabasho qabtid 19
- Sida cabasho/dareenkaaga loo gudbiyo 20
- Anshaxa iyo U hogaansanaanta 21
- Qarinta iyo Qarsoodiga 21
- Nidaamka lidiga ku ah aargoosiga 22
- Dhago nugaylka jawaab celinta 22

Fullinta 23

Fariin hoggaamineed

Saaxibada Qaaliga ah:

Waxaan ugu faraxsannahay inaan idinla wadaago *Habdhaqanka IRC Hal beegga hab-dhaqan xirfadeedkeena*

Hab-dhaqanka IRC wuxuu muddo dheer u taagnaa qeexidda QIYAMMADA asaasiga ah ee: **Daacadnimo**, **Adeega** iyo **Isla-xisaabtan ku dhisan xilkasnimo**, iyo dhaqan-gelintooda. Qiyamkaan iyo fulintoodu waxay mideeyaan shaqaalaha IRC ee dunida daafaheeda ku sugan in ay si adag u dhowraan in hagidda barnaamijyadayadu u adeeggaan wanaagga macaamiishayada, iyadoo la buuxinayo filashooyinka deeq bixiyayaashayada, sidii qof masuul uga ah hantidooda.

Ujeedada qoraalkaanu waa xaqiijinta inaan gudanno shaqadeena innagoo raacayna anshaxa iyo ma'baadiida shaqo ee taageeraya ka hawlaha bani'aadamnimada. Dejin siyaasadeedi oo keli ahi wax ma tarto haddii aan ficil loo baddalin Taasi waa sababta hab-dhaqanka IRC loo ballaariyay, looguna daray tillaabooyin dhaqan gelineed iyo tusaaleyaal wanaagsan oo lagu saxayo cabashooyinka.

Hab-dhaqankaan loogama gol-lahayn inaad khabiir ku noqotid dhan walba, laakiin wuxuu kaa caawinayaa u dhug lahaanshaha khataraha, hagitaankaaga iyo inaad samaysid doorshada saxda ah. Waa inaan mar walba u feejignaataa god-daloolada u dhexaysa siyaasadaha iyo fulintooda si aan u il tirno/awdno. Waraaqdan waxaa loogu talo galay shaqaalaha laakiin waa in sidoo kale lala wadaagaa bahwadaagta, deeq bixiyayaasha iyo taageerayaasha kale si ay u arkaan heerka xilkasnimadayada.

Fadlan aan xil iska saarno kor u qaadidda qiyamka hab-dhaqanka IRC ee shaqokasta oo aan qabanayno.

Si Daacadnimo ah

David Miliband
Madaxweynaha ahna Madaxa fulinta/ maareeyaha hawlaha IRC.

Qiyamkeena

Daacadnimo/sharaf

Macaamiishayada, bahwadaagtayada, jaalleyaashayada, deeq bixiyayaashayada iyo dhammaan bulshooyinka shaqadayadu saameyso waxaan kula dhaqannaa furfurnaan, daacadnimo iyo amaano ilaalin.

Isla- xisaabtan ku salaysan xilkasnimo iyo hufnaan

Waxaan xil naga saaranyahay—keli-keli iyo wadar ahaanba—dabeecaddayada, falalka aan smaynayno iyo natiijooyinka ka dhasha.

Adeeg

Waxaa masuuliyad naga saarantahay bulshada aan u adeegno iyo deeq bixiyayaasha suurta geliya adeeggayaga.

TILMAAMAHA HOGAAMINEED

Waxaan qaadannay *Xeerka Anshaxa ee caalamiga ah ee bisha cas iyo laanqeyrta cas iyo hay'adaha aan dowliga ahayn ee ka shaqeeya gar gaarka Masiibooyinka*. Waxaa na haga mabaadi'dooda aasasiga ah ee bani'aadamnimada sida bani'aadamnimada, eex la'aanta, dhexdhexaadnimada, iyo madaxbanaanida. Haddaba:

- **Dhiirigelinta koowaad ee wax ka qabashada musiibooyinku waa inaan ka yarayno dhibaatooyinka bulshada qeybtooda nugul ama u jilicsan musiibooyinka. Waxaan aqoonsannahay xilka naga saran gacan siinta (gargaarka) bani aadaminimo meel kasta oo looga baahanyahay.**

- **Waxaan gargaarkayaga ku bixinnaa annagoon eegayn jinsiga, diinta, ama dhalashada cidda loo gargaarayo iyo dhammaan hayb soocyada. Mudnaanta bixinta deeqda waxaan ku salaynaa baahida jirta iyo meesha looga bahjan yahay.**

- **Gargaarkayaga looma adeegsan doono in lagu xoojiyo fikir siyaasadeed ama diimeed, sidoo kale ballan qaadyadayada, wax bixintayada iyo taageeradayada shardi uga dhigi mayno in fikir diimeed ama siyaasadeed la qaato.**

- **Waxaan ku dadaalaynaa in aannan noqon aalad u adeegta siyaasad dowladeed. Marnaba uma uruurin doonno xog siyaasadeed, dhaqaale, ama milatari oo xassaasi ah dowlado ama ururro/hay'ado taasoo ujeedkeedu ka baxsanyahay adeeg bani aaamnimo.**

Waxaan sidoo kale xaqiijineynaa oo aan fulineynaa xaquuqda aadanaha ee waafaqsan qarammada midoobay. *Xeerka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, Heshiiska Xaquuqda Carruurta, iyo Warbixinta Xogyahaya Guud ee qarammada midoobay ee ku saabsan galmada qasabkaa iyo si qaldana looga faaiideysto dadka gargaarka loo fidinayo.*

Mas’uulidaha wadajirkaa ah ee inaka saaran hir gelinta Xeerkan

Hirgelinta xeerkaani waa masuuliyad ka dhexaysa cid kasta oo fulinaysa himilada IRC. Masuuliyiinta, Saraakiisha, Shaqaalaha, Tababartayaasha, Shaqaalaha ku meel gaarka ah iyo bah wadaagta matalaysa IRC waa in ay dhammaantood u hoggaansamaan xeerkaan.

Masuuliyadaha qofka

Qof walba waxaa xil ka saaranyahay in uu barto halbeegyada anshaxa shaqada. Xilka ayaa kaa saran marka:

- **Lagugu wargeliyo ama aad heshid xog** adigoo baranaya hal beegyada anshaxa ee ku aaddan kaalintaada shaqo iyo ka qeyb gelka tababarrada ku saabsan anshaxa iyo u hogaansanaanta nimaadka.
- **Tilmaan qaado** lana tasho dadka kale marka shaqada la qabanayo aysan caddayn.
- **U dulqaado/adkayso oo iska caabbi cadaadisyada lagu doonayo in lagu jebiyo anshaxeena shaqo ama looga gol leeyahay in lagu dumiyo tiirarka anshaxa shaqada iyodoo looga gol -leeyahay in la gaaro ujeed/dan gaar ah.**
- **Soo gudbi cabasho** haddii wax khaldanyihiin.

Mas’uuliyadaha Maamulaha ama Maareeyaha.

Haddii aad shaqaale maamushid ama kormeertid, ogoow waxaad laguu dhiibay amaano. Si aad u dhowrtid kalsoonida, waa inaad:

- **Ku hogaamisaa tusaale** oo u noqotaa horseed dadka kale.
- **Sare u qaad wacyiga** hal beegyada IRC, si dadka aad kor meeraysid u helaan aqoon iyo awood ay ku hir geliyaan halbeegyada IRC.
- **U kuurgal oo la soco anshaxa** dadka aad kor meeraysid, xilna iska saar hawlaha aad masuulka ka tahay.
- ✔ **Si deg deg ah uga jawaab** qof walba oo soo gudbiya cabasho ku saabsan anshaxa, hubina in arrin walba loo xalliyo sida ugu mudan oo caddaaladi ku dheehantahay.

Xilka/waajibaadka naga saraan saaxiibadeena.

IRC waxaa xil ka saaranyahay u diyaarinta shaqaalaheeda deegaan nabad gelyo iyadoo aan lagu kala saarayn heerka madaxnimo ama goobaha shaqo sidoo kale waxaa IRC ka go'an.

Waxaad hir gelin kartaa habdhaqanka IRC marka aad:

- ✔ **Ula dhaqan dhamaan saaaxibada si sharaf iyo ixtiraam leh.**
- ✔ **Hubi in go'aammadaada shaqaalaysiintu ay ku salaysan yihiin aqoonta qofka shaqadoonka ah iyo mudnaan ee aan lagu salayn dabeecadaha gaarka ah ee qofka ee aan la xiriirin shaqada.**
- ✔ **Xurmee xaquuqda qof kasta.**
- ✔ **Sii adeegga ku habboon dadka naafada ah iyo dadka baahida gaarka ah qaba.**
- ✔ **Diid oo ha aqbalin nooc kasta oo tacaddi ah ama ku tagri fal awoodeed.**
- ✔ **Ha qaban shaqa kasta oo khatari ku jirto kuna dhiifoonoow arrimaha la xiriira bed-qabka iyo badbaadada adoo raacaya baratakoollada nabad gelyada deegaanka aad joogtid.**
- ✔ **Ilaali macluumaadka/xogta u gaar ah shaqsiga.**

Waa inaad ka fogaataa/Iska ilaalisaa:

- ✗ **Inaad ku qiimaysid dadka arrimo shaqada ka baxsan.**
- ✗ **Jeesjeeska midab sooca ku salaysan, afxumada, emaillada gefka ah/sharaf dilka ah, ama sawirrada anshax xumidda ah.**
- ✗ **In aad shaqaysid adiga oo isticmaalay maandooriye ee aan la banaaneyn.**
- ✗ **Inaad bixisid xogta shaqaalaha si aan habboonayn, gaar ahaan xogta shakhsiyadeed ee gaarka ah.**

Waa in aad soo sheegtaa:

- ▲ **Ficillada aan loo baahnayn, habboonayn ama xurmo darrada ah ee ku saabsan doonista xiriir galmo oo qasab ah.**
- ▲ **Xoogsheegashada, hanjabaadda, cabsi gelinta, ku danaysiga, quursiga ama xadgudubyada afka/cayda ama jirka dadka kale.**
- ▲ **Xaaladaha halis gelin kara badbaadada, nabad gelyada ama bed-qabka shaqaalaha.**
- ▲ **Cadownimada ku wajahan shaqsiyaad gaar ah taasoo la xiriirta jinsiyadooda, diintooda, jinsiga ah yihiin, Rabitaan galmada, curyaannimo, ama sifooyinka kale oo sharcigu ilaaliyay.**

SU'AAL: *Waxaan maqlay jaalkayga shaqada oo aflagaaddaynaya dumarka /hablaha nala shaqeeya. Saaxiibkay/jaallahaygu wuxuu si joogto ah u aflagaaddeeyaa dumarka nala shaqeeya marka aysan nala joogin isagoo ku kaftamaya. Ima farxadgeliyo arinkasi. Maxaan sameeyaa?*

JAWAAB: Haddii aad ku qanacsantahay, meel gaar ah taga, una sheeg inaad inaadan ku faraxsanayn erayadiisa any yihiin gar-daro/af- xumo. Haddii aad khatar kala kulmaysid u sheegiddiisa ama uusan wax ka baddalin afxumadiisa waxaad raacdaa hab-raaca ku cad qeybta "caawimaad raadin" ee xeerkaan.

SU'AAL: *Toddobaadkii hore, maamulahayagu wuxuu shaqo noogu diray goob cayiman. Markaan u sheegay in saraakiishayada nabad galyadu u calaamadiyeen goobtaas meel aan la tegi Karin sababo nabad gelyo darro awgood, waxay ku adkaysatay inaan tagno maxaa yeelay waxaa goobtaa/meeshaa jooga macaamiil kaalmo u baahan. Maxaan sameeyaa?*

JAWAAB: Badbaadada shaqaalahayagu waa lagama maarmaan, saraakiisha nabad gelyaduna waxay u gogol xaaraan baratakoolka nabad gelyo oo lagu xaqiijinayo arrintaas. Haddii aad u aragtid inaad ku khasbantahay inaad jebsid halbeeg nabad gelyo, raac hab-raaca kuu cad qeybta "caawimaad raadinta" ee xeerkan.

Siyaasadaha iyo tilmaamaha IRC:

- Nidaamka Usinaanta fursadaha Shaqo
- Siyaasadda ka hortaga ficiladda aan ku habooneyn goobaha shaqqdda
- Siyaasadda dejinta/ hooy siinta
- Nidaamka Isticmaalka Maandooriyaha ee goobta shaqada
- Xeerka ka hortaga rabshadaha goobaha shaqada
- Nidaamka/siyaasadda badbaadada iyo nabad gelyada caalamiga ah ee IRC
- Nidaamka xifdinta/ qarinta xogta
- Baratakoollada nabad gelyada iyo badbaadada

Xilkasnimadayada ku aaddan macaamiishayada

IRC waxay caawisaa/kaalmaysaa dadka noloshooda iyo waxyaabaha ay nooloshoodu ku tiirsan tahay ay halakeeyeen khilaafyo iyo masiibooyinka dabiicigaa, si ay uga soo kabsadaan, dibna u maareyaan noloshooda iyo mustaqbalkooda. Arrintani waxay u baahantahay xilkasnimo dheeri ah, si fayo qabkooda loo adkeeyo, uguna shaqayno daacadnimo marka aan fulinayno hawlaha bani aadamnimo ee la inaku aaminay.

Waxa aad hirgelin kartaa hab dhaqanka IRC marka aad:

- ✔ **Xushmaysid sharafta, qiyamta, taariikhda, diinta iyo dhaqanka dadka aan u adeegno.**
- ✔ **Ku soo xul macaamiishaada baahidooda adigoo raacaya shuruudaha mashruuca kana fogaynaya hayb sooc ku salaysan jinsi, diin, dhalasho iyo kala faquuqid.**
- ✔ **Ka illaali macaamiisha/ ka faaiideystayaasha mashruuca nuuc kasto oo xadgudub ah, sida ku dirqinta galmo iyo ka ganacsiga dadka, sida tahriibka.**
- ✔ **Taxadar dheeraad ah samee, si aad u badbaadisid caruurta.**
- ✔ **Ixtiraamtid sirta/xogta u gaarka ah hay'adda, u hogaansanaatid baratakoollada illaalinta xogta, sidoo kalena xogta macaamiisha aad bixisid marka lagama maarmaanka ay tahay oo kali ah, adigoo raacaya shuruucda deeq bixiyaasha.**
- ✔ **Inaad muujisid in macaamiishu yihiin banii aadam xurmad leh, sawir kasta oo loo isticmaalay IRC isgaarsiinteeda, waa inuu yahay sawir qofkiisu raali ka yahay in la soo bandhigo.**
- ✔ **Aad hubisid in cilmi baarista IRC ee la xiriirta dadka loo helo oggolaansho inta aan la bilaabin.**

Waa Inaad iska ilaalisaa/ka fogaataa:

- ✗ **In macaamiishu u qabtaan shaqaalaha IRC shaqo shakhsiyeed (tusaale ahaan, sida shaqaaale guri).**
- ✗ **Inaad kula kacdid macaamiisha cabsi gelin, dulaysi, sharaf-rid ama dabeecadxumo/qallafsanaan.**
- ✗ **Jir-dilka macaamiisha ama edbinta loogu xad gudbayo jirkooda.**
- ✗ **Falalka macaamiisha da' kasta oo ay yihiin loogu yeerayo galmo, ama xiriir dhow ama gaar ah.**
- ✗ **Ka ganacsiga galmada haba ka jireen deegaankaas sharciyo ogolaanaya.**
- ✗ **Ku khasbidda macaamiisha inay iska iibiyaan agabka lagu caawiyay.**

Waa Inaad soo sheegtaa ama Ka soo warbixisaa:

- ▲ **Macmiisha oo loola dhaqmo si guracan iyadoo looga faaiideysanayon duruufaha ay ku sugan yihiin.**
- ▲ **In la muusuq – maasuqo go'aanada lagu qorayo dadka loogu talagalay gargaarka iyadoo qaarna laga reebo qaarna la siiyo.**
- ▲ **Adeegsiga gurracan ee awoodeed ama jago marka gargaar bani'aadamnimo la bixinaayo.**
- ▲ **Shaacinta khaldan ee xogta macaamiisha.**

SU'AAL IYO JAWAAB (Q&A)

SU'AAL: *Waxaan jeclahaya inaan taageero ganacsiyada ay qaxootigu leeyihiin marka waxaan adeegsadaa mid ka mid ah daryellada dhallaanka guryaha ku yaal oo uu leeyahay macmiilkaygu. Inaan sidaasi ma saxbaa?*

JAWAAB: Haddii macmiilku oggolyahay, way bannaantahay in la taageero ganacsigiisa/ganacsigeeda sharciga ah. Si kastooy noqotaba, shuruudda iyo qiimaha loo gooyay/dejiyay dadweynuhu waa in ay la mid noqdaan kuwa loo dejiyay shaqaalaha IRC.

SU'AAL: *Waxaa dhacda inaan ogaado in gabar ka mid ah macaamiishaydu bixiso xog been ah si ay u noqoto qaxooti. Iyada oo aan ahayn qaxooti, misana waxaan ogahay in ay uga soo cararayso wadankeeda nolol aad u adag. Ma inaan wax iraahdaa?*

JAWAAB: Haa, waa inaad jeedisaa aragtidaada ku aaddan arrintaan oo kale sida ku cad qeybta "caawimaad raadinta" ee xeerkaan. Iyadoo laga yaabo inaad u janjeersatid inaad isha, misana sax ma ahan inaad saas yeeshid.

SU'AAL: *Waxaan u baxnay safar shaqo toddobaadkii hore, oo aan ku maqnayn /dhaxnay habeen. Waxaan rumaysnahay in saaxiibkay ku kacay fal dhillaysi ah mudadii aan safarka ku maqnayn. Maxaan sameeyaa?*

JAWAAB: Tani waxay xadgudub ku tahay hal-beegyada hab-dhaqanka IRC, waana inaad raacdaa hab-raacyada ku cad qeybta caawimaad raadinta ee xeerkaan.

Siyaasadaha/shuruucda iyo talooyinka iyo tilmaamaha IRC:

- Siyaasadda dhowridda dheefqabayaasha laga dhowrayo dirqinta iyo xadgudubyada
- Siyaasadda dhowrista dhallaanka
- Siyaasadda La dagaalanka Ka Ganacsiga Dadka
- Siyaasadda xafidaada sirta ama xogta
- Siyaasadda/nidaamka furfurnaanta xog-helidda
- Hagaha cilmi baarayaasha ee habraacyada guddiga dib-u eegista hay'adda

AkhrinDheeraad ah:

- Xeerka Anshaxa caalamiga ah ee laanqeyrta cas, bisha cas iyo hay'adaha aan dowliga ahayn ee gargaarka u fidiya dadka ay haleeleen masiibooyinku
- U.N. Qarammada Midoobay Xeerka caalamigaa ee xuquuqda aadanaha iyo xeerka xuquuqda dhallaanka
- U.N. Qarammada Midoobay Warbixinta Xogyahaya Guud ee qarammada midoobay ee ku saabsan adeegsiga dhibbanayaasha ku dirqinta galmada

Waajibaadkeena ku aaddan deeq bixiyayaasha

Deeq bixiyayaasheenu waxay noogu deeqaan lacagta aan ku shaqeeyno, sidaas darted waa inaan xil iska saarnaa ilaalinta hantida (Mas'uuliyadda qaadannaa). Waxaa naga go'an inaan raacno farriimaha iyo shuruudaha ay dejiyaan deeq bixiyayaashayadu iyo sidoo kale inaan buuxinno himilooyinkooda/filashooyinkooda ku aaddan in hantida ay bixiyaan si habboon loogu adeego macaamiishayada.

Waxa aad hirgelin kartaa hab dhaqanka IRC marka aad:

- ✔ **Fahamtid xeerarka deeq bixiyayaasha ee ku aaddan shaqo-gudashada iyo xilkasnimada/Isla xisaabtanka.**
- ✔ **Ilaalisid saacadaha shaqada, xisaab-celinta, iyo inaad hubisid in dokumintiga xisaabaadka lacagtu ay saxanyihiin.**
- ✔ **Dooratid bahwadaag awooda in ay adeegga ugu wacan u fuliyaan macaamiisha, si ku habboona ugu kuurgala/raadraaca shaqada iyagoo raacaya nidaamka deeq bixiyayaasha.**
- ✔ **Illaalisid macluumaadka u gaar ah mu'asasada deeq bixiyayasha iyo arrimaha gaarka ah ee xogta shaqsiga.**
- ✔ **Ogeysii deeq bixiyayaasha khaladaadka xogta la soo sheegay, kuna dadaashid baahin daahfuran.**
- ✔ **Codsi u qortid helitaanka deeq kooban, maal-uruurin, u qareemid iyo suuq geynta daacad ah sharafna huwan waafaqsanna dhammaan sharciyada dhaqan galay.**
- ✔ **Noqo mid ka run sheega IRC iyo waxqabadkeeda.**

Waa Inaad ka Fogaataa:

- ✗ **U hogaansanaan la'aanta sharuudaha deeqada ama isticmaalka aan habooneyn ee hantidada hay'ada.**
- ✗ **Saacadaha iyo waqtigs, qarashaadka baxay oo been laga sheego.**
- ✗ **Isticmaalida lacagaha maalgelinta wayn ee jirta oo lagu daboolayo qarashka qancinta lacagaha kale iyada oo aan jirin ansixinta deeq bixiyaha.**
- ✗ **Baahida mashruuca, qarashaka baxay, tiradda dadka ka faaiideystay mashruuca ama natiijadda mashruuca oo been laga sheego oo been laga sheego.**
- ✗ **Been ka sheegid xulashada hay'addaha maxaligaa ama kormeer la'aan hay'adaha maxaligaa marka ay shaqo nala qabanayaan.**
- ✗ **Sheegasho been ah oo aan sheegano hay'ad kale waxqabadkeeda.**
- ✗ **Isu keenista macluumaadka siyaasada, milatariga dhaqaalo ahaan xasaasi ah oo matalaada maalgeliye walba oo ujeedada aan ka aheyn bani'aadannimada.**
- ✗ **Ka aqbalid deeq bixiyayaasha hadiyad laga helay hawl sharci daro ah ama musuq-maasuq ah.**

Waa Inaad soo sheegtaa:

- ▲ **Beensheegida waqtiga, wargelinada qarashaad la isticmaalay ama la galay.**
- ▲ **Diiwaangelin macaamiisha been ah ama la musuq-maasuqay.**
- ▲ **Xatooyo ama leexashada gargaarka. Ama hantida hay'adda.**
- ▲ **Dhaqamada lacag aruurinta aan ku habooneyn.**

SU'AAL: *Waan ogahay in qarashaadka qaarkood, sida Alkoladda ama madadaalada, aan lagu dalici Karin mashaariicda. Ma ku dalici karaa "sundry" si aysan uga soo muuqan warbixin maaliyadeed?*

JAWAAB: Maya, waxaa laga yaabaa inaad xaqiijin weysid qarashka, basle waxaa lagu dalaci karaa ama laga bixin karaa haraaga miisaaniyadda. Qarashaadka aan la ogolaan karin ee uu galo xafiiska waa in loogu dalacaa lacagaha xisaabta furan ee IRC.

SU'AAL: *Waxay u dhowdahay dhammaadka mashruuca, waxaana helay codis iib qalab kombiyuutar si loo qarashgareeyo baaqiga lacaga mashruuca inta aanu dhicin. Ma saxiixaa iibka, si markaas aan u gudbiyo xisaab xirka anigoo ka dhigaya in lacagtii la wada isticmaalay.*

JAWAAB: Maya, waa inaadan sameynin iib weyn dhammaadka lacagta si markaas loo siin karo laynka miisaaniyada hartay.

SU'AAL: *Barnaamijka aan la shaqeeyo wuxuu leeyahay diirad lagu gaarayo boqolkiiba 50 dumarka. Shaqaalaha mashruucu waxay diiwaangelineysaa dumarka si ay u muujiyaan tiradda haweenka ka faaiideysanaya mashruuca, laakiin xaqiiqo ahaan waxaan gaarsiineynaa adeegyada barnaamijka oo ka faaiideysanaya ragooda, ee si toos ah mashruucu uma taageerayo dumarka. Maxaan sameyn karaa?*

JAWAAB: Waa inaad u sheegtaa arinkaas sida lagu sharaxay qeybta "Caawin Helida" ee Xeerkan.

La xiriir Xeerarka iyo tilmaamaha IRC:

- Xeerka ilaalinta xogta ama sirta hay'adda
- Xeerka Kalsoonida Maaliyadeed
- Qalqaaliska Hadyadeed ee Urur iyo Xeerka Aqbalaada
- Xeerka Macluumaadka Furan
- Diiwaanka barnaamijyadda IRC, nidaam tilmaameedka shaqo, iyo waraaqaha muujinaya waajibaadka shaqo
- Nidaamyada tilmaamaya habka wax soo iibsashada iyo qaybinta alaabooyinka mashaariicda
- Xeerkal.T ee maamulayo qalabka iyo illaalinta xogta
- Buuggaagta maamulka xisaabaadka

Balanqaadyadeena ku aadan qandaraas-layaasha nala shaqeeyana

Inaan qiime wanaagsan ku helno agabka aan soo iibsanayno waxay u baahantahay hufnaan sare inta lagu guda jiro habka was soo iibsashada. Waxaa naga go'an tartarn xor iyo cadaalad ah oo aan ku tartansiinayno shirkadaha aan wax ka iibsano, iyadoo lagu taageerayo iib-geeyayaasha aan wadaagno ku dhaganaanta dhaqangalinta anshaxa iyo masuuliyadda, kuna tirtirayno dhaqamada khiyaanada iyo musuqa ay sameeyaan kuwa doonaya inay hab aan wanaagsanayn kaga faa'iidaan gargaarka loogu talo galay dadka baahan.

AWaxa inaad hirgalinaysaa qaabka IRC-da Markii Aad:

- ✔ **Soo sheeg haddii aad aragtid ama maqashid musuqmaasuq la xiriira iibka kaas oo wax u dhimaya dahana IRC.**
- ✔ **Hubiso qiime wanaagsan in la helo marka aad dayaarinaysid masruuca iyo marka la iibsanayo alaabaha iyo adeegyada.**
- ✔ **Raac siyaasadaha soo iibsashada, oo ay ku jiraan siyaasadaha la xiriira codsiyada iibsiga, ogeysiinta qandaraaska, dhiraandhirinta qandaraska, habraaca baahinta qandaraaslaha iyo hubinta macluumaadka qandaraaslaha.**
- ✔ **Ula dhaqan qandaraaslayaasha loo aqoonsaday inay u qalmaan wax ka iibsiga iyo wakiiladooda si cadaalad ah oo simman.**
- ✔ **Ilaali xogta, qiimaha badeecada, heshiisyada iyo shurudaha iibka ee qandaraaslayaasha ama macaamiisha aan wax ka iibsano.**
- ✔ **Sii Qandarraslayaasha sharraxaad dhamaystiran oo cad markii laga diido dalabkooda.**
- ✔ **Joogtay oo hubi in ay kala saran yihiin waajibaadka qofka codsiga iibka siinaya tartamayaasha, qofka ogolaanaya iyo qofka hubinya alaabaha la soo iibsanayo.**
- ✔ **Ka munaaqishooda nidaamka, siyaasadda wax iibka ee dowladda ama deeqbiyaasha marka mashruuca la bilaabayo.**
- ✔ **Go'aamiso in shatiayada wax dhoofinta loo baahanyahay ama xayiraado jiraan ka hor inta aan la soo iibin alaab, sofweer ama teknoolajiyad dawladi ilaaliso ama ku xiran waddan wax dhoofinta iyo wax la soo dagiddu sharciyeysan yihiin.**

Waa Inaad ka Fogaataa:

- ✗ **La wadaagida warbixinno si aan sinnayn aad ula wadaagto iibiyayaasha inta lagu guda jiro nidaamka qandaraaas u tartamidda.**
- ✗ **Sheegidda warbixin qarsoodi ah oo ku saabsan shirkad aad u sheegto shirkad kale.**
- ✗ **Aqbalidda wax kasta oo hibeyn ah oo qiime leh (oo ay ku jiraan hadiyadaha, sasabasho, madadaalada, laalushka ama hadiyad musuq) taas oo keenaysa ama u muuqanaysa inay keenayso saamayn aan haboonayn ama faaiido aan cadaalad lagu helin.**
- ✗ **Aqbalidda alaabaha heerkoodu hooseeyo ama badelka ah ama adeegyada aan buuxin tilmaamihii/shuruudaha laga rabay.**

Waa Inaad Warbixin ka soo gudbisaa:

- ▲ **Tilmaamaha qandaraaska aan si cadaalad ah lagu samayn, dukumintiga lagu codsadey iibka, iyo xulashadda qandaraaslaha.**
- ▲ **Khiyaanada qandaraaska, is gaashaanbuursiga ama dhaqamada kale oo aan cadaalad ku dhisnayn ee ay ku heshiiyaan qandaraaslayaashu si ay u helaan qandaraaska tartan la'aan iyagoo ka hortegaya tartan hufan.**
- ▲ **Habraaca soo bandhigidda xogta qandaraslaha oo aan dhamaystirnayn.**
- ▲ **Wax is dhaafsiga dhinacyada ku lug leh falal argagixisonimo, shaqaalaysiinta caruurta, ku tumashada xuquuda aadanaha, ku shaqaynta xaalado khatar leh ama aan suurtagal ahayn, ama warshadaynta sharci darrada ah, iibinta ama daabulidda hubka.**
- ▲ **Lacag lagu bixiyo magac aan aheyn magaca heshiiska lagu galay.**

SU'AAL: *Qandaraasle u muuqda inuu IRC shaqo la qabto mustaqbalka ayaa igu casumay casho. Ma aadi karaa?*

JAWAAB: Haa, inaad ka aqbasho qandaraas qaate cunto waa la ogolaan karaa hadii aan martiqaadkaasi: 1) aanay ahayn mid loola jeedo in lagu gaaro go'aan gaar ah; 2) waa inaysan casumaadu ka badan labo jeer sanadkii); 3) waana inay ka dhacadaa meel haboon; 4) waana inaan lagu xadgudbeyn sharci jira; iyo 5) wax sharaf dhac ahna aysan ka soo gaareyn IRC.

SU'AAL: *Waxaan hadeer aadnay dhinaca nidaamka u qalmida iibiyaha laakiin waan ka gudubnay booqashooyinka aaga ee iibiyayaasha. Saaxibkeyga shaqada wuxuu sameeyay warbixinta aan u gudbinay qeybtaas foomamka ah. Maxaan sameeyaa?*

JAWAAB: Ka beensheegida xogta ku saabsan qandarasslaha ama ganacsatada aan wax ka iibsano waa mid aan la aqbali karin. Waa inaad raacdaa nidaamyada lagu tilmaamay qeybta kuu sahlaysa inaad "Caawin Helshid" ee Xeerkaan.

SU'AAL: *Alaabta aan ka helnay qandaraslaha waa alaab aad uga tayo liidata waxii (alaabtii) aan dalabanay. Uma muuqato inay tahay sabab wanaagsan, balse qof ayaan saxiixay/ogolaaday. Miyaan iska dhaga tiraa arinkaan?*

JAWAAB: Maya' waa inaad u sheegtaa dareenkaaga sida lagu sharaxay qeybta "Caawin Helida" ee Xeerkaan. Iyadoo tayadda alaabta kala duwanaan karto sababo kala duwan awgood, haddan ma aqbali karno inaan qaadano bedelka alaabtii aan dalbanay oo tayadeedu hooseyso/liidato.

La xiriir Xeerarka iyo tilmaaha maamulka IRC:

- Xeerka Kalsoonida Maaliyadeed
- Xeerka Haynta Dhokumentiga Caalami ahaan Waajibka ah
- Buggaagta iibka

Akhrin Dheeraad ah:

- Daabacaada Xafiiska Mareykan u qaabilsan gargaarka: Tilmaamayaasha wax is daba marinta/musuq-maasuqa
- War fidinta Kormeeraha Guud ee xafiiska Gargaarka Mareykan: Ka hortaga wax is daba marainta iyo u Hogaansanaanta—Buuga hagaha ee wax ka qabdka Masiibada Bani'aadannimada ee Bariga Dhexe

Balan qaadkeena ku aadan ururadda nala shaqeeya.

Shaqo la wadaagista hay'adaha maxaligaa, kuwa heer qaranka iyo hay'adaha aan dawliga ahayn ee caalamiga ah, sidoo kale kuwa heer goboleed iyo gaarka loo leeyahay, waxay aasaas u yihiin shaqada IRC. Waxaa naga go'an sara u qaadista iskaashiyada wax ku oolka ah ee u suurto gelinaya IRC inay dabagasho yoolakeeda fog/durugsan, taasoo keeni karta kaalmo deg deg ah oo waxtar leh taartna dad badan.

Waxaad hir gelin kartaa hab-dhaqanka IRC marka aad:

- ✔ **Sare u qaaadid iskaashiyada ku saleysan xilkasnimada/isla-xisaabtan, daahfurnaanta, ixtriraamka, sinnaanta, isku dheelitirka iyo ka wada qayb galka.**
- ✔ **Dooro bah-wadaag awood u leh fullinta, oo hubi inay helayaan taageerada lagama maarmaanka u ah inay gaaraan heerarka waxqabadka la asteeyey.**
- ✔ **Sii bah-wadaagta aqoonsi ku aadan doorkii ay ka cayaareen in la gaaro u jeedooyinkii mashruuca/ barnaamijka.**
- ✔ **Taageero u fidi hay'adaha aan bah-wadaagta nahay si looga fogaado oo loo tirtiro khatar kasta oo suuro gal ah oo la saadaalin karo taasoo la xiriirta badbaadada iyo nabad-gelyada.**
- ✔ **Hubi xiriir wanaagsan ee waxqabad oo ku dhisan is qadarin labo dhinac ah.**
- ✔ **Qaad tallaabooyin ku haboon oo lagu hubinayo in maalgelinta IRC loo isticmaalo si waafaqsan shuruucda, sharuudaha deeq bixiyayaasha iyo nidaamka IRC.**
- ✔ **Ka qayb hay'adaha maxaligaa qorsheynta, qaabeynta, fullinta iyo dib u eegida barnaamijyada IRC mar walba oo ay suurtogal tahay.**

Waa inaad ka Fogaataa:

- ✗ **Isla weynaan ama xushmad daro aad kula dhaqanto hay'adaha wada-shaqeyntu naga dhexeyso iyo shaqaalahooda.**
- ✗ **In hay'adda ururadda aan wada shaqeyno six xun loogu adeegso awooda.**
- ✗ **Matalaad Been ka sheegid shaqadda/waxqabadka hay'addaha aan wada shaqeynta leenahay.**

Waa Inaad soo sheegtaa:

- ▲ **Waa inaad soo sheegtid haddii aad la kulantid ama maqashid musuq-maasuq la xiriira xiriirka wada shaqeyn ee hay'adaha nagala shaqeeya mashaariicda.**
- ▲ **Masuqmaasuqa ama go'aamada eexasho ee la xiriirto hay'adaha nagala shaqeeya mashaariicda.**
- ▲ **Inaad ku xulatid hay'ada nagala shaqeeya mashaariicda qaab musuq maasuq ah oo aan daah furayn.**
- ▲ **XHay'adaha nala shaqeeya oo xatooyo u geysta ama leexsashada gargaarka.**
- ▲ **Laayacniyo and Ka warhaynta aan ku filneyn ee waxqabadka ama wax ku oolnimada bahwadaagta.**

SU'AAL: *Madaxa hay'ada bah-wadaagta wuxuu ku weydiistay inuu arko nuqulka rasmiga ee miisaaniyada, taasoo lagu maalgeliyay sida heshiis hoosaad. Miyaan ila wadaagi karaa?*

JAWAAB: Waa inaad la tashataa maamulaha IRC ee masuulka ka ah qarinta xogta deeqbixiyayaasha ama iyo Xafiiska guud ee talo-bixinta si ay arrintaas go'aan uga gaaraan in xogtaas la bixin karo.

La xiriiro siyaasada iyo tilmaamaha IRC:

- Xeerka Kalsoonida Maaliyadeed
- Siyaasada Badbaadada Caalamka iyo nabadgelyada ee IRC
- Xeerka dhowrista dadka mashaariicda faa'ideysta
- Sharciga/xeerka ka hortaga in shaqaaluhu danahooda gaarka ah u adeegsadaan darajada iyo awood la siiyey
- Siyaasada Furan ee xog iswaydaarsiga
- Nidaamka Maamulida heshiisyadda hay'addaha nala shaqeeya, sida NGOda maxaligaa
- Hab-raaca maaliyada

Akhrin Dheeraad ah:

- Xeerka Anshaxa ee Hay'addaha Laan Qeyrta Cas iyo Bisha Cas iyo Hay'adda caalamiga ah ee aan dawliga ahayn ee gargaarka ka shaqeeya

Balanqaadkeena ku aadan Hay'adeena

IRC waxay u badeshaa tabarucayada deeqbixiyaasha gargaarka bini'aadanimo. Si aad arrintaas u sameysid, IRC waa inay ahaataa mid aan gorgortan ka gelin oo ku filan qabashada shaqadeeda. Waa inaan illaalinaa hantida IRC oo aan ka dhignaa lexejeclada koowaad ee IRC.

Waxaad sii wadaa Qaabka IRC Markii Aad:

- ✔ **Ka fogaatid oo u sheeg maaneyjarkaaga haddii aad la kulantid ama maqashid dhaawici kara danaha IRC.**
- ✔ **U isticmaal hantida IRC si quman oo sharciga waafaqsan, kana ilaali xadid, wax is dabamarin, dayac iyo dhib kale (aan halis gelinayn naftaad ama dadka kale).**
- ✔ **Dhowr buugaagta iyo diiwaanada saxda ah.**
- ✔ **U kuur gal xakameynta hagaagsan oo dhowr waajibaadka la xiriira codsiyda, ansixinta iyo iyo xaqiijinta wax gadashada.**
- ✔ **Ka war hay warbixinaha kharashaadka, lacag siinta cida wax laga soo iibsaday, warqada mushahaar bixinta iyo farqiga miisaaniyada ee hawllaha aan caadi ahayn.**
- ✔ **Ka Ka illaali sirta iyo xogta hantida cida kasta oo ay tahay inaysan arkin ama galaan gal u yeelan.**
- ✔ **Kaydi ama ka saar dukumiintiga si waafaqsan nidaamka kaydinta dukumiintiyada.**
- ✔ **Si buuxdo ula shaqee marka ay xog ku weydiiyaan hanti dhowraha IRC ama baarayaaha.**

Waa Inaad ka Fogaataa:

- ✗ **Inaad u adeegsato jagada ama xogta IRC dan shaqsiyadeed oo aad wax ku helayso.**
- ✗ **Inaad u adeegsato waqtiga shaqadaee IRC ama hantideeda inaad ku qabato shaqo cid kale.**
- ✗ **Inaad ka qeyb qaadatid shaqo qoris/shaqaaleyn ama go'aanadda lagu shaqaaleynayo qof aad qaraabo tihiin ama reerkaaga ka mid ah adigoon sheegin xiriirka idinka dhexeeya.**
- ✗ **Raadinta, aqbalaada wax kasta oo qiimo leh (Sida hadiyadaha, laaluusha…) taa oo abuuraysa saamayn aan sharci ahayn ama ku faa'iideysi xaqdaro.**
- ✗ **Ka been sheegista diiwaanada ama warbixinaha (sida qabashada lacagta, diiwaan gelinta waqtiga, agabka, xogta barnaamijta iyo warbixinta maaliyadeed.**
- ✗ **Gudbinta xogta aan ku habooneyn in la gudbiyo ama xakameynada xad-dhaafka ah ee xaalada gudaha.**
- ✗ **Ku xirid qalab IT-ga ama barnaamijyada kumbuyuutarka oo aan fasax loo haysan.**
- ✗ **Baabi'inta diiwaanada si muuqata u taageeraya hanta- dhowrida, baaritaanka, dacwad ama sheegashada.**
- ✗ **Sheegid been, marin habaabin, ama warbixin aan dhamaystirnayn oo ku saabsan waxa uu hanti-dhowrka/baare IRC ku weydiistay.**

Waa Inaad Ka warbixisaa:

- ▲ **Been abuurka, xatooyada, laaluush ama xatooyo lacageed.**
- ▲ **Isticmaalka qalabka kumbutarada ee IRC si shaqsiyadeed, hawlo siyaasadeed, xayeysiisama hawlo kale oo aan fasax loo haysan.**
- ▲ **Ficilo wax u dhimi kara sumcada IRC ama wax u wax yeelayn kara muqaalka guud ee IRC.**

SU'AAL: *Shirkad uu leeyahay seedigey ayaa bixisa adeeg aan is leeyahay IRC way u baahan tahay. Ma u sheegi karaa seedigeyga fursadaas?*

JAWAAB: Haddii fursadaa mar hore loo baahiyey si furan, waxaad u sheegi kartaa seedigaaga. Si kastaba ha ahaatee, waa inaadan sameyn wax kasta oo uu seedigaa kaga hormarayo tartamayaasha kale. Tusaale ahaan, waa inaadan la wadaagin xogta hoose ee IRC ama xog ku saabsan fursad gaar ah. Ugu dambeyntii, waa inaad u sheegtaa qaybta xulashada wax soo gadida xiriirka idinka dhexeeya.

SU'AAL: *Sidee ayaan ku garanayaa haddii shay ka kooban yahay "macluumaadka qarsoodiga ah" ee aan bixin karin iyada oo aan loo helin ogolaansho?*

JAWAAB: Xogta qarsoon inta badan waxaa lagu go'aansadaa si ku saleysan hadba marxalada taagan. Ka taxadar oo u qaado in dhammaan xogta IRC ay tahay hanti. Ma aha in dhammaan waraaqa sirtu ku qoran tahay lagu sunto "Sir." Haddii aadan hubin wax ku saabsan qoraal gaar ah, inta aadan xogtaas daaha ka furin, wareyso maamulahaaga ama ama Xafiiska Golaha Guud.

La xiriir Shuruucda iyo tilmaamaha IRC:

- Siyaasada shaqqala ee khilaafka su salaysan danaysigaa
- Siyaasada Kalsoonida Maaliyadeed
- Siayaasada Qarsoodiga
- Siyaasada ogolaanshaha Isticmaalka Warbixinta Cilmiga farsamada.
- Siyaasada Keydinta dukumiintiyadaa waajibaadka Caalamiga ah
- Siyaasada iyo hagidda Warbaahinta iyo Baraha Bulshada
- Siyaasada kale eek u saabsan ilaalinta xogta iyo agabka kumbuyuutarada.
- Tilmaamaha Mashaariicda laga fuliyo Gudaha Mareykanka (USP) ee u doodista

Xilka naga saaran Bulshada

IRC waxay xil iska saartay inay masuul ka noqoto muwaadiniinta caalamka. La shaqaynta dowladaha, sharci dejiyaasha, warbaahinta iyo bulshooyinka ku nool wadamada aan ay hay'adu ka shaqeyso inay ugu shaqeyso daacadnimo, amaano iyo xaq soornimo. Waxaan taageernaa qaanuunka xukunka sharciga, anagoo saray u qaadayna heerarka anshaxa ee dalalka iyo bulshooyinka goobaha aan ka hawl galno.

Waa inaad taageertaa hab dhaqanka IRC Markii Aad:

- ✔ **Bixi xog sugan oo dhamaystiran marka aad la macaamilayso deeq-bixiyayaasha, warbaahinta, hanti-dhawrayaasha, hay'adaha sharciga ama baarayaasha.**
- ✔ **Ku xir shaqadeena hindisayaasha keenaya illaalinta, xasiloonida iyo ka qaybgelinta bulshooyinka barakacay.**
- ✔ **Yaree oo xakamee dhibaato wixii dhibaato ah oo shaqadeenu u keenaso deegaaka.**
- ✔ **Hubi in hawlahaagau inay waa faqsanyihiin heerarka ku jiro Xeerkaan marka barbaahintu kuu aqoonsanayso inaad tahay xubinta ka tirsan IRC.**
- ✔ **Raadi talo ka timaada Xafiiska La talinta Guud marka la xaajooneysid wadamada ku jiro cuna qabataynta dhaqaalaha ama markii la soo bandhigo codsiyada laga laaban karo.**
- ✔ **Raadi talo ka timaada Xiriirada Caalamka ee dhammaan wacyigelinta warbaahinta, jawaabaha, wareysiyada iyo raadinta talobixinta guud ee bulshada.**
- ✔ **La tasho waaxda u dooda ama u dhaq-dhaqaaqda hawlaha wacyi gelinta.**

Waa Inaad ka Fogaataa:

- ✗ **Bixinta iyo qaadashada wax kasta oo qiimo u leh qof walba (oo ay ku jiraan saraakiisha dowlada) si markaas loo saameeyo go'aamada aan xaq ahayn ama loo galo eex.**
- ✗ **Sheego been, marin habaabin, ama warbixin aan dhamaystirnayn marka codsi rasmi ah ka timaado hay'adaha dowliga.**
- ✗ **Ku cadaadinta saaxiibadaa inay sameeyaan taageero siyaasadeed ama deeq.**
- ✗ **U oleynta sharci dejin ama ka qeybqaadashada olole siyaasadeed adiga oo metalaya IRC. Iyada oo aysan ka qeybgalayn Waaxda U dooda arimahaas.**
- ✗ **Xiir-hoosaadyada Xiriir waxyeelayn kara dhexdhexaadnimadaada (ama muuqaalka dhaxdhaxaadka) marka lagau gudo jiro shaqada IRC ama waxyeeleyn u gaysan ka sumcada IRC.**

Waa Inaad Ka soo warbixisaa:

- ▲ **Codsiyada in lala shaqeynayo mamnuucida aan la cuna qabatayn.**
- ▲ **Xaaladaha halista geliya caafimaadka, badbaadada ama deegaanka.**

SU'AAL: *Sarkaalka canshuurta ayaa ii sheegay inay qaadaneyso lix usbuuc in kumbiyuutaradeena la soo saaro. Wuxuu kaloo ii tibaaxay inay aad u soo degdejinayaan soo saarista haddii aan siino kaliya dhaqaale yar "dhiirigelin ah" isaga. Runtii waxaan u baahannahay kumbiyuutaradaas, dhaqaalaha uu na weydiistayna waa mid yar. Ma siin karaa dhaqaalahaas?*

JAWAAB: Dhab ahaantii maya! Illaa lacagta la codsaday ay noqoto mid dowladu sharciyeysay, dowladdu ay qqadanayso, daah-furan oo ay cadahay meesha iyo sifaha ay ku baxayso. Taasina waa tusaalaha lacag bixinta la mamnuucay. IRC kama qeybgaleyso falal aan habooneyn, xitaa haddii ay micnaheeda tahay in shaqooyinkeena ay hoos u dhacayaan ama ay saamayn xun ku yeelanayso natiijada shaqadeena.

SU'AAL: *Siyaasi deegaanka ka soo jeeda oo aaminsan in shaqada IRC ay uga faaiideysan karo xaafiiskeeda. Ma siin karnaa waraaqaha daabacaada, iyo photopiga si ay ugu daabacato waraaqaha ololeheeda siyaasadeed?*

JAWAAB: Maya, lama ogola in loo adeegsado waqtiga, qalabka ama hantida IRC howlo siyaasadeed.

SU'AAL: *Waxaan arkay qoraal baraha bulshada la soo dhigay oo sheegaya in IRC ay takoortay qabiil gaar ah. Ma wanaagsan tahay haddii aan si toos ah u dajiyo diiwaanka?*

JAWAAB: Waa inaadan ka qayb qaadan doodaha arimaha bulshada adigoo ku hadlaya magaca IRC. Waa inaad u sheegtaa arrinta maamulahaaga ama kooxda IRC u qaabilsan isgaarsiinta kuwaas oo go'aanka ugu haboon ka gaari doona.

Tilmaamaha iyo siyaasada/nidaamka haboon ee IRC:

- Siyaasada la dagaalanka Laaluushka
- Siyaasada la dagaalanka Hanti ka samaysida deeqaha
- Siyaasada Hufnaanta dhaqaalaha
- Siyaasada Cuna qabateynka Dhaqaalaha iyo U hogaansanaanta La-dagaalanka Argagaxisada
- Siyaasada Xakameynta Dhoofinta
- Siyaasada la dagaalanka jebinta xeerarka
- Siyaasada Deegaanka
- Tilmaan-raace Wax gadashada

Caawin Helida

Qeybtani waxay sharaxeysaa antiga la hayo si hagaagsan u fullinta ee Xeerka Anshaxa guud ee IRC.

Sida loo Arko Anshaxa Xaalada adag:

Inta aanda go'aan gaarin ama adan dabagal ku samayn falka isku xiga oo loo arko inay yihiin anshax, hadaba is weydii:

- **Ma yahay go'aanku ama tallaabadu mid waafaqsan xeerka IRC iyo waajibaadyada la xiriirka dibada?**
- **Kumaa laga yaabaa inuu saameeyso go'aanku?**
- **Talo dheeraad ah ama khibrad wax ma tari lahayd?**
- **Haddii go'aankaan la shaaciyey, ma ku niyad samaan lahaa inaan u sharraxo saaxibada shaqada ama baarayaasha?**
- **Xukun-gaariddaydu ma dhexdhaxaad baa, mise waxaan ka leeyahay dan shakhsi-ahaaneed natiijada taas oo iga dhigaysa qof aan dhex-dhexaad ahayn?**

Waajibaadkaaga ah inaad hadasho:

Qalad la galo waxaa ugu murugo/dhibaato badan, marka dadku dhinac kale wax ka eegaan. Intaa waxaa dheer, ogaanshaha waajibaadyada sharciga iyo anshaxa la xiriira shaqadaada, waxaa lagaa filayaa inaad ka hadasho haddii:

- **Adigu haddii aadan marnaba hubin tallaabada ku habboon talo bixin raadso.**
- **Tallaabooyinka gaarka ah ama go'aamada aadan ku niyad-samayn.**
- **Haddii aad ogtahay ama aad ka shakisantahay in mid ka mid ah kooxaha soo socda ay ku lug yeesheen, ama ay ku lug yeelan rabaan howl sharci daro ah ama aan anshax aheyn oo la xiriirta shaqada IRC:**
  - **Maamulayaasha IRC, shaqaalaha, shaqaalaha aan joogtadda ahayn ama mutadawaciinta**
  - **Qandaraaslayaahsha wax ka iibsada hay'adda**
  - **Hawl-wadaagayaal ama qandaraaslayaasha hoose**
  - **Wakiilada, la taliyayaasha ama dhexdhaxaadiyayaasha matalaya IRC.**

Wadooyinka lagu soo gudbiyo cabashooyinka:

IRC waxay leedahay dhowr qaab oo xiriir ay ku sameen karaan shaqaalaha raadinaya talo ama jecel inay soo gudbiyaan walaacyadooda. Waa inaad doorataa waddada aad dareemaysid inaad ku niyad santahay, laakiin ogow saaxiibada arrintaada ugu dhaw—kormeerahaaga ama maamulka gudaha— ayaa ah kuwa ugu fiican ee ku caawinaya. Dhaqaalaha la helikaro, ee qoran waxaa ka mid ah:

ARIMAHA TUSAALAHA	DHAQAALAHA LA FILAN KARO
Arimaha deegaanada hay'adu ka shaqeyso	**Kormeeraha/Maamulayaasha aan ajanebiga ahayn**
Is afgaranwaaga goobta shaqada (shaqooyinka, qiimeynta waxqabadka, magdhowga, faa'idooyinka, iyo is khilaafidda kormeerayaasha ama shaqaalaha isla shaqeeya)	**Maamulka shaqadda iyo Shaqaalaha (HR)**
Badbaadada shaqaalaha iyo hantida IRC	**Amniga**
Warbixinta maaliyadda, xisaabinta, warbixinta canshuurta, buuggaagta iyo diiwanada	**Maaliyadda**
Lacag aruurinta ama u hogaansanaanta shuruudaha deeq bixiyaha ama shuruudaha mashaariicda	**Qeybta Maamulida heshiisyadda- contracts**
Iibsiga ama nidaamka wax soo iibsashada	**Nidaanka wax soo iibsashadda caalamigaa**
Arimaha sharciga ama fasiraada siyaasad	**Xafiiska golaha Guud**
Arimaha xeerka anshaxa ee kor aan lagu soo sheegin, ama arimaha aan weli la xalin kadib wadatashi bilow ah	**Qeybta Anshaxa iyo u hogaansanaata shuruucda iyo nidaamka hay'adda**

Ogow dhamaan hantida ay masuul ka yihiin isku xirka Qeybta Anshaxa iyo U hogaansanaanta haddii ay soo gaarto walaac muujinaya xeer jabin ku imaankarta Xeerka Anshaxa IRC.

SIDA LOO SOO GUDBIYO CABASHOOYINKA/WALAACYADA

Ma ku niyad-santahay inaad kala hadasho kormeerahaaga ama maamulaha aan ajinebiga ahayn arrimaha la xiriira walaaca aad qanto ama dareenkaaga?

HAA → **LA HADAL KORMEERAHAAGA AMA MAAMULAHAAGA.**

MAYA

Ma lahadli kartaa maamule aan ajinebi ahayn ama maamule heer goboleed?

HAA → **LA HADAL MAAMULE KALE.**

MAYA

Ma la xiriiri kartaa qaybha (tusaale ahaan, Shaqada iyo shaqaalaha, Amniga, maaliyadda, Xafiiska golaha guud, iwm.)?

HAA → **LA XIRIIR QAYBTA TAAKULEYNTA.**

MAYA

E-mail u dir integrity@rescue.org ama itsicmaal khadka taleefanka ee qaybta Anshaxa iyo U hogaansanaanta.

HAA → **(FIIRI BOGGA XIGGA)**

Integrity@rescue.org

E-mail kaan waxaa la socda oo maamula ECU ee New York. E-mail ayaad ku soo diri kartaa su'aalaha iyo walaacyada adigoo isticmaalaya ciwaankaan.

Khadka taleefanka ee qaybta Anshaxa iyo U hogaansanaanta

Khadka taleefanka ee qaybta Anshaxa iyo U hogaansanaanta waxaa la heli karaa marka:

- **Aad dareemaysid inaadan ku niyad samayn isticmaalida qaab kale oo xiriir lagu samayn karo.**
- **Qaababka kale ay noqdaan kuwo aan shaqeynayn, aan la isticmaali karim ama u muuqda kuwo aan jawaab lahayn.**
- **Aad doonaysid inaad ku soo wargelisid walaacaaga si qarsoodi ah.**

Khadka taleefanka waxaa maamula EthicsPoint, taas oo ah qayb sadexaad oo madax banaan oo aan uruurin ama aqoonsan lambarada taleefonka ama ciwaanada IP-ga ee kumbiyuutarka. Waxaa la heli karaa 24 saac maalintii, todoba maalmood isbuucii, laguna heli karo luuqado kala duwan. Waxaa adeegsan kara qof walba ee ku lugleh IRC (oo ay ku jiraan shaqaalaha, macaamiisha, ganacstada IRC wax ka iibsato ama la shaqeeya).

Haddii aad isticmaashid taleefanka, khabiir tababaran oo ka tirsan EthicsPoint ayaa faahfahain kooban ka sameenaya su'aashaada iyo cabashadaada/arinkaaga. Faahfaahinta waxaa loo gudbinayaa Qeybta Anshaxa iyo U hogaansanaanta ee IRC si jawaab dheeraad ah loo helo.

EthicsPoint waxaa laga heli karaa taleefon ahaan ama onlaynka:

TALEEFON

Dibedda Mareykanka:
+1 (503) 352-8177
(wicitaan aan lacagtu kugu socon)

Gudaha Mareykanka:
(866) 654-6461

ONLAYNKA

Booqo irc.ethicspoint.com
Ka dibna raac tilmaamaha

Qarsoonaanta iyo sir ahaanshaha

Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad sheegtid magacaaga marka aad soo gudbinayso cabasho. Tani waxay u ogolaaneysaa kuwa ka jawaabaya cabashadaada in ay kula soo xiriiraan haddii warbixin dheeraad ah loo baahdo iyagoo u egeeya cabashadaada si buuxda. Magacaaga oo aad sheegtana sidoo kale waxay naga caawinaysaa hubinta inaadan kala kulmin ka aargoosi gudbinta warbixint xaqiiq ku dhisan. (Waxaa jiri kara xaalado gaar ah marka la soo bandhigayo aqoonsigaaga oo sharci ahaan loo rabo ama muhiim u ah in si buuxda loo baaro loona wajaho walaacyadaada/cabashooyinkaaga.)

Haddii aad dooratid inaad is sheegtid marka aad ku jirtid khadka taleefanka ee IRC, IRC waxay ku dadaalaysaa inay u kaydiso xogtaada si qarsoodi ah, iyada oo si toos ah u la wadaagaysa markii loo baahdo oo kaliya cidda markaas gacanta ku haysa ama la socota arrimaha aad soo gudbisay.

Haddii aad soo gudbinayso warbixin si qarsoodi ah, waxaa muhiim ah in aad faahfaahin dheeraad ah ka bixiso. EthicsPoint wuxuu ku siinayaa lambar dacwadeed waxaana lagaa rabaa inaad si joogta ah u booqato website-ka si aad uga jawaabtid xogaha ay codsadaan kooxda baaritaanka. Dacwdaha aan laheyn macluumaad ku filan oo baarayaashu ku sii wadi karaan dacwadda waa la xiri karaa.

IRC waxay ogoshahay in shaqsiyaadku ay u soo gudbin karaan walaacyadooda si qarsoodi ah, laakiin waa in aan loo isticmaalin khadka taleefanka qaab khaldan (tusaale ahaan, in la soo gudbiyo cabasho been abuur ah sababo qarsoon dartood). Warbixinada qarsoodiga ah oo si khaldan loo soo gudbiyo waxay dhaawacayaan sharafta dadka isticmaala khadka taleefanka.

Siyaasadda Aargoosasho la'aanta

IRC uma dulqaadaneyso aargoosiga loo gaysto qof walba oo, wado saxan, ku soo gudbiya cambasho ama qeyb ka noqda baaritaan, xittaa haddii eedaymuhu yihiin kuwo aan caddeyn.

Qof kasta, iyadoo aan loo eegayn xilka uu hayo ama muddo- xileedkiisa, oo lagu helo inuu ku lugyeeshay fal aargoosi ah oo loo gaystay qof soo gudbiyey walaac uu ka qabo anshaxa iyo u hogaansanaanta, waxaa laga qaadayaa tallaabo sharci ah, iyadoo ay suurtogalna tahay in shaqada laga joojiyo. Haddii ay kula tahay in lagugu sameeyay aargoosiga, waa inaad la xiriirtaa Khadka taleefanka si wax laguugu qabto.

IRC waxay ku dhiirigelinaysaa maamulayaasha iyo shaqaalaha in shaqsi ahaan ay uga soo warbixiyaan xadgudubyada waxaana, iyadoo ay ku xirantahay xaalado gaar ah, taas loo adeegsan karaa inay noqoto shay wax yareenaya marka la qiimaynayo habka anshax marinta/ talaabo ka qaadista.

Ka jawaab celinta degdega ah

IRC-du waxay cabashooyinka u qaadanaysaa si dhab ah, waxayna ka jawaabaysaa warbixinada la soo gudbiyey iyadoo aan la fiirinin khiyaaaraad kale. Iyadoo la ixtiraamayo arrimaha u gaarka ah iyo kalinimada qofka laga yaabo inay saamyn ku yeelato warbixintu, IRC-du waxaa laga yaabaa inay awoodi waydo inay faahfaahin ka bixiso wixii ka soo baxay baaritaankayaga, ama kuu sheegto tallaabooyinka falcelish ahaan loo qaadi doono. Markastoo ay suurtagal tahay, waxaan kula socodsiin doonnaa xaaladdu meesha ay marayso, si aad u ogaatid in cabashadaadii falcelin ku haboon laga bixinayo. Xubnaha maamulka sare ee maamulka iyo guddiga hantidhowrka ee golaha agaasimayaasha IRC-da waa inay sidoo kale daba-galaan xalinta dacwadaha.

SU'AAL IYO JAWAAB (Q&A)

SU'AAL: ***Waxaan si wanaagsan u hubaa inaan arkay xadgudub ku aadan habraaca IRC-da, laakiin si dhab ah uma hubo. Ma rabo inaan ka warbixiyo wax hadhaw khalad noqon kara. Maxay tahay inaan sameeyo?***

JAWAAB: **Waa inaad cabashadaada si degdeg ah u soo gudbisaa, xattaa haddii aadan wada hayn dhamaan xogta, taas oo qofkii ku haboonaa uu ku gali lahaa arinta, una go'aamin lahaa in xeer-jabin ay dhacday iyo in kale. Inta aad si maangal ah u rumaysantahay in xeer-jabin ay dhacday, waxaad warbixinta ku soo gudbinaysaa waddo saxan, waxaadna sameenaysaa wax saxan.**

Fullinta

Qof kasta oo jabiya xeerka IRC-da ama siyaasadaha asaasiga ah, iyadoo aan loo eegayn xilka ama muddo-xileedka, waxaa laga qaadi karaa talaabo sharci ah, oo ay ka mid tahay, in shaqada laga cayriyo. Tusaallooyinka soo socda waa tusaalooyin ku saabsan anshaxa kuwaas oo keeni kara talaabo sharci ah in la qaado:

- **Jabinta/ ku xadgudubka Xeerka**
- **U tilmaamidda ama ku dhiirigelinta dadka kale inay jabiyaan Xeerka**
- **Ku guuldareysiga in la soo gudbiyo xeerar la jabiyey oo la ogyahay ama laga shakisan yahay**
- **Soo faragashiga howsha hantidhowrka ama baaritaanka**
- **In aadan iskaashi muujin ama run aadan sheegin inta lagu guda jiro howsha hantidhowrka ama baaritaanka**
- **Ka aargoosi ku aadan dadka kale ee cabashada soo gudbiya**

Jabinta sharciyada ama xeerarka waxay keeni kartaa tallaabo sharci ah oo laga qaado adiga, saaxibadaada, IRC-da ama dadka shurkaada la ah ama iibiyayaasha, taas oo sababi karta:

- **Ganaaxy**
- **Shaqo joojin**
- **Ka mamnuucid**
- **Xirid**

Dadkaas shaqeenaya iyagoo matalaya IRC-da waxa la weydiin doonaa inay saxiixaan bayaan cadeynaya inay fahmeen una hogaansami doonaan xeerkaan. Qof walba wuxuu saxiixi doonaa bayaanka marka uu u shaqo bilaabo IRC-da, iyo sannad kasta oo ka dambeeya inta sharcigu u ogolyahay.

QORAAL-KOOBAN

Xarunta dhexe ee hay'adda

122 East 42nd Street
New York, New York 10168-1289
Mareykanka
Taleefonka: + 1 212 551 3000
Fakiska: + 1 212 551 3179